

Baaritaanka Caruurta ee Xilliga Hore

Marka ilmahaagu gaaro 3 jir, waa xilligii LACAG LA'AAN baaritaan loogu sameyn lahaa!

Baaritaanka Caruurta ee Xilliga Hore waa baaritaan lagu eego sida ilmahaagu u korayo jir ahaan iyo horumarinta. Baaritaanka waa in lagu sameeyaa ilmaha oo dhan ka hor inta aysan bilbaabin xanaanada caruurta.

Xilliga ugu wanaagsan baaritaanka waa marka ay 3 sano jir noqdaan, laakiin baaritaanka waa lagu sameeyaa 4 iyo 5 jirba.

Baaritaanka caruurta, qof aqoon iyo tababar u leh ayaa hubinaya:

- Caafimaadka, aragga iyo maqalka
- Dhererka, miisaanka iyo koritaanka jirka
- Dhaqdhaqaaqa iyo isu dheelitirka
- Fikirka, luqada iyo xirfadaha isgaarsiinta
- Koritaanka bulshada iyo dareenka
- Diiwaanka talaalka (talaalada)

FIRO GAAR AH: Haddii aad dareen ka qabto xaaladda ilmahaaga, markiiba la soo xiriir. Baaritaanka waxaa lagu sameyn ilmaha da'a kasta oo uu jiro, xitaa dhalashada ilaa 3 jir.

Sadex sababood oo baaritaan loogu sameeyo 3 jirka

1. Baaritaanku waxa uu ilmaha ka caawiyaa in ay u diyaargarobaan waxbarashada.
2. Wax kasta oo dareen ah oo la xiriira caafimaadka ama waxbarashada ayaa xilli la ogaadaa oo laga caawiyaa.
3. Qoyskiinu waxa ay ogaanayaan adeegga aad heli kartaan ee idin caawin kara.

Marka ilmahaagu 3 sano gaaro:

- **U qabo balanta baaritaanka LACAG LA'AANTA ah.** Soo wac **(612) 668.3715** ama balanta ka sameysto internetka ee mpschoools.org/academics/ece/screening
- **Buuxi foomamka caafimaadka** ee lagu soo diro oo keen balanta.
- **Ilmahaaga keen balanta caafimaadka.** No sheeg haddii aad dooneyso in gaadiid lagu soo diro xilliga balanta.

KA QABSO BALANTA BARTA INTERNETKA EE

mpschoools.org/academics/ece/screening

Dooro calaamadda baaritaanka 3 jirka ee hoose:



MA DOONEYSAA GAADIID?

Soo wac **612.668.3715** haddii aad dooneyso in lagaa caawiyo gaadiidka ku geeya belinta baaritaanka.



LA XIRIIR

3345 Chicago Ave. S., Minneapolis, MN 55407

612.668.3715 | screen@mpls.k12.mn.us | mpschoools.org/academics/ece/screening



Department of
Early Childhood Education

NAGALA SOCO!



November 2018 | SOMALI

Maxaad Ka Fileysaa Baaritaanka Ilmaha

Waxaa la hubinayaa koritaanka jir
ahaaneed ee ilmahaaga

Waxaa la hubinayaa aragga iyo
maqalka ee ilmahaaga

Ilmahaaga waxa uu sameynayaa
dhaqdhaqaaq lagu ogaanayo
koritaankiisa

Dhamaadka baaritaanka, waxaa
lagula socodsiinayaa sida
ilmaahagu u korayo.

Haddii ay jiraan meelo u baahan in
ilmahaaga laga taageero,
shaqaalaha ayaa kaa caawinaya
goobta aad ka heli karto adeegga
ilmahaagu u baahan yahay.



Minneapolis Public Schools
1250 W. Broadway Ave.
Minneapolis, MN 55411

Ph: 612.668.2140 | Fax: 612.668.2146
mpschoools.org/academics/ece